

Iswiidhishka dadka waaweyn

Bilowga koorsada: Xili kasta la bilaabo

Xiliga la dalbanaayo: Sanadka oo dhan

Dalabka waxa loo soo dirayaa: Växjö kommun
Arbete och välfärd
Växjöloftet
vuxenutbildning
Box 1222
351 12 Växjö

Sfi waxa weeye waxbarashda aasaasiga ah ee luqada Iswiidhishka. Waxaad sidoo kale wax ka baranaysaa bulshada Iswiidhishka.

Waxbarashadu waxa loogu talo galay qofka aan iswiidhishku aheyn luqadiisa hooyo. Waxaad dhigan kartaa Sfi markaad ka diiwaangashan tahay kamuunka Växjö ee aad haysato lambarka shakhsiga bulshada oo rasmi ah ama aad tahay muwaadin Midowga Yurub ka soo jeeda oo degaan ahaan ku qoran Växjö. Waxaad is qori kartaa laga bilaabo sanadka aad buuxineyso 16 sanno.

Dhamaan waxbarashadu waa bilaash.

Waxa balanqaadka Växjö adigu dalban kartaa meesha aad wax ka dhiganseyso. Waxaad kala dalban kartaa dugsiyada kala duduwan ee kamuunka Växjö ogolaansho ka haysta. Waxaad leedahay fursad weyn oo aad ku helayso dugsiga haya qaabka waxbarashada ee adiga kuguu haboon. Waxa suurtoagal ah in aad waxbarashadaada shaqo, baragtiig ama waxbarashooyinka kale la wadato.

Waxa jira saddex dariiq oo lagu dhigto sfi-da.

- Dariiqa waxbarashda 1. Qofka aan luqadiisa qorina karin akhriyina karin ama qofka dhowr sanno oo kaliya uun soo dhigtey dugsiga. hab waxbarasho oo qunyar socda.
- Dariiqa waxbarashda 2. Qofka soo dhigtey dugsiga hoose dhexe ama dugsiga sare. hab waxbarasho oo caadi ah.
- Dariiqa waxbarashda 3. Qofka bilaabey waxbarasho jaamacadeed ee leh hab waxbarasho oo wanaagsan ama leh awood uu kaliguu ku shaqeysanaayo. hab waxbarasho oo degdeg ah.

Balanqaadka

waxbarashada dadka waaweyn, la-taliyayaasha xirfadaha iyo waxbarashda

Xarunta xidhiidhka, telefoonka: 0470-410 00 • E-maylka: studievagledning@vaxjo.se

BALANQAADKA VÄXJÖ
Waxbarashada dadka waaweyn

Växjöloftet waxa weeye wadashaqeyn ka dhaxeysa kamuunka Växjö, Arbetsförmedlingen iyo ganacsatada si shaqooyin badan looga abuurto Växjö.

www.vaxjo.se/vuxenutbildning